



# City of Seattle

Gacaliye reer Seattle,

Inaad gurigaaga ku kululayso saliid waa qaali, laakiin Pump kuleyl koronto oo tamar fiican leh ayaa si weyn hoos ugu dhigi karta kharashaadka kuleyliyahaaga isago isla markaasna qaboojinaya Gurigaaga xilliga xagaaga kulul.

Maalgelin waqti xaddidan ah, waxaad ku badbaadin kartaa ilaa \$8,000 marka aad u wareegeyso bamka kulaylka.

## WAXA KA MID AH SABABAHA BADAN EE LOOGU BEDELO KULAYLINTA SALIIDA TAN KORONTADA:



Badbaadinta in ka badan  
50% biilka kulaylka  
gurigaaga.



Adigo dareemaya raaxo sanadka oo  
dhan: marka kululaynta iyo qaboojinta  
Gurigaagu yihiin hal nidaam.



Ku beddelashada shidaalka fosil  
midka korontada nadiifka ah waxay  
caawisa deegaanka.

### Waa kan sida loogu badbaadiyo ilaa \$8,000 bamka kulaylka:

**Tallaabada 1.** La xiriir qandaraaslayaasha ka qaybgalaya ee ku qoran [www.NoMoreOilHeat.com](http://www.NoMoreOilHeat.com) si aad u hesho booqasho guri oo bilaash ah iyo qiyaasta kharashka. Waxaan ku talinaynaa in la helo saddex qiyaasood (estimates).

**Tallaabada 2.** Dooro qandaraasle oo rakib bamka kulaylka. Qandaraaslahaagu waxa uu si toos ah ugu dalban doonaa Lacag dib ugu celin dhan \$6,000 qaansheegtaada.

**Tallaabada 3.** Jooji haantaada saliidda (ama ku buuxi meesha ama meesha ka saar) si aad u hubiso in aanay saliidu fadhiihin haantaada iyada oo aan la isticmaalin, taasoo keenaysa soo daadasho mustaqbalka.

**Tallaabada 4.** Codso \$2,000 oo cashuur ka dhaafid ah marka aad xaraynayso cashuurta dakhliga ee federaalka sanadka soo socda.

U beddelashada bamka kulaylka korontada waxay hoos u dhigta kharashyada kuleyliyaha waxayna wanaajisaa raaxada iyo caafimaadka guud ahaan, waxad kalo caawineysa deegaanka adoo ka takhalusaya saliid wasakhda ah. Isticmaal dhiirigelintan wakhtiga xaddidan ah si aad u taageerto beddelkaaga!

Si aad xaq ugu yeelatid, waa inaad tahay mulkiilaha guri ku yaal Seattle oo leh foornada saliidda oo shaqaynaysa. Booqo [www.NoMoreOilHeat.com](http://www.NoMoreOilHeat.com) wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u hesho qandaraasle ka qayb qaadanaya maanta! Qoysaska dakhligoodu hooseeyo waxay magaalada Seattle ka heli karaan bamka kulaylka oo bilaash ah. Booqo [www.seattle.gov/cleanheat](http://www.seattle.gov/cleanheat) si aad u aragto in aad u qalanto.

Sincerely,

Michelle Caulfield, Interim Director  
Office of Sustainability and Environment

Rebates funded by:



City of Seattle

